# Geedi Socodka Kambaala

## Qabyo qoraal ku saabsan Istaraatejiyada Baddaha Soomaaliyeed- Baaqa kowaad.

1. Xubno ka socdey Guddiga la Xiriirka Arimaha Soomaaliyeed ee qaabilsan ka hortaga burcad badeedda (waa geedi socodkii Kambaala) kana kooban Dowladda Federaalka Soomaaliyeed, Puntland, Galmudug iyo Somaliland ayaa ku kulmay Addis Ababa inta u dhaxeysay 12-14 Maarso 2013, si ay u soo saaraan Qabyo Qoraal khuseeya habkii la isu kaashanayo. Shirka waxaa marti galyey UNPOS, UNODC, IMO, FOA oo ay taageerayaa xafiiska lagu magacaabo (Oceans Beyond Piracy – badaha ka shisheeya goobaha Burcad Badeedda).
2. Markii ugu horeysayba waxaan ku heshiinay in aan arimaha ugu wada hadalno si heer farsamo ah isla markaasna aan meel iska dhigno si ku talagal ah arimaha siyaasadda, si ay shirka ugu soo baxaan arimo la taaban karo loona dhiso hab ka turjumaaya xaqiiqda jirta sidoo kala ku qotoma habkii loo hormarin lahaa mustaqbalka iyo sidii loo hergalin lahaa arimaha istaraatejiyadda Badaha Soomaaliyeed. Guddi farsomo ahaa waxaanu ku heshiiney Qabyo Qoraal ku saabsan Istaraatejiyadda Arimaha Badaha Soomaaliyeed, taasoo dhab ahaa dib u eegis ay ku sameyn doonaan Masuuliyiinta heerka siyaasadeed jooga.
3. Anagoo dood weyn oo tafaasiil leh yeelanay kadib, waxaan ku heshiiney in Qabyo Qoraalkan Khuseeya Istaariitijiyadda Badaha Soomaaliyeed uu ka koobnaado arimaha Amniga, Dhaqaalaha, Bulshada, Bii'ada uuna koobo arimaha sharciga iyo hormarinta awoodaha wax qabad ee la xiriira arimaha Badaha Soomaaliyeed. Waxaa kaloo isku raacney in Qabyo Qoraalkaanaga ee ka kooban IStaraatejiyada Badda uu ka koobnaado arimaha aan dooneyno inaan gaarno mustaqbalka iyo kuwa waaqiciga ah ee hadda jira eena ahaadaan kuwa waqtiyeysan.
4. Qabyo Qoraalkan Soomaaliyeed ee khuseeya Istaraatijiyada arimaha Badaha Soomaaliyeed iyo talo soo jeedinteena hore ee ku saabsan habkii lagu hergalin lahaa ujeedooyinkan, ayaa ah talo ay lee yihiin dadla Soomaaliyeed, khuseeyana dadka Soomaaliyeed. Wali waxaa harsan in laqabto hawlo baddan- dhab ahaan Qabyo Qoraalkan khuseeya Istaraatiijeyada Badaha, waa laga doodi doonaa, waxna waa laga bedi doonaa. Si loo hormariyo Qabyo Qoraalkan khuseeya Istaraatiijiyada badaha Soomaaliyeed loona hergaliyo ujeedooyinkanaga bilowga ah waxaanu waydiisaneynaa Bulshadda Caalamku in diiradeeda marwaliba saarnaato sidii lagu dhisi lahaa laguna joogteyn lahaa awoodo dadka Soomaaliyeed taasoo loo diyaaranayo dadka Soomaaliyeed laguna hormariyo dalka gudahiisa hadba meesha ay suurta gal ka tahay.

**Isku xirka iyo Iskaashiga**

5. Waxaan ugu baaqeynayaa Bulshada Caalamka sida wadamada, Qaramada Midoowe(UN), ururada Dowliga ah (IGOs), NGOs , ganacsatada arimahan daneeya iyo qeynbaha kaleba- in ay la xiriiraan iskaashina la sameeyaan masuuliyiinta Soomaaliyeed, iskaashigaasoo khuseeya heerkarar kali gadisan ee kaalmada, qorshooyinka khuseeya caqabadaha badaha Soomaaliyeed, arimaha kale, iyo kor u qaadista arimaha xirfadaha.
6. Si aan u fudadeyno habka iskaashiga lagala xiriiraayo caqabadaha ka jira arimaha badaha Soomaaliyeed, arimaha kale oo jira iyo kor u qaadista awooda wax qabadba, waxaan talo u soo jeedinaynaa masuuliyiinta in ay magacaabno hal qof oo lagala xiriiro Istaraatiijiyada arimaha Badaha Soomaaliyeed ee heerarkeeda kala gedisan- , kaasoo noqon doono qofka kaliya ee la xiriirayaa Bulshada Caalamka. Waxaan kaloo soo jeedinaynaa Masuuliyiinta in dadka lala xiriirayo (Focal Points) la siiyo awoodo ay kula xiriirayaan Bulshada Caalamka sidoo kale ay isugu xirayaa arimaha khuseeya Badaha Soomaaliyeed.
7. Waxaan ka codsanaynaa Bulshada Caalamka in ay Soomaaliya ka taageerto dadaalkan. Waxaan ka codsanaynaa Bulshada Caalamka in ay dhinto ama yareyso tiradda dadka aan kala xiriirayno Bulshada Caalamka ee khuseya caqabadaha ka taagan arimaha badaha Soomaaliyeed, arimaha kale loo baahan yahay in wax laga qabto, iyo kor u qaadida xirfadaha wax qabad. Waxaan waydiisanaynaa Bulshada Caalamka in ay dadaalkooda iskugu geeyaan- ayagoo yareynayo tirade kulamada lala yeelanayo Bulshada Caalamka- guddiga la xiriirka arimaha burcad badeeda ka jirta dhulka ka baxsan xeebaha Soomaaliyeed, Geedi socodka Kambaala iyo xafiis cusub ee Qaramada Midoowe (UN) u qaabilsan Soomaaliya. Tan labaad waxaan codsanaynaa in bixiyo kaalmo farsamo oo ku aadan xubnaha lala Xriirayo (Focal Points), habka farsamo xubnahaas ay isugu duba ridayaa howlahooda kulana xiriirayaa Soomaalida.
8. Waxaan u maleynaynaa in uu mugdi ka jiro sharciga Namberkiisa yahay 37, ee khuseeya arimaha Badda Soomaaliyeed ee soo baxay 1972 lana xiriira heshiiskii sharciga badaha caalamiga ah ee soo baxay 1982. Waxaana garwaaqsanahay in arintin si weyn caqabad ugu tahay habkii kaalmo balaaran iyo kor u qaadista xirfadaha Dadka Soomaaliya ee ka shaqeeya arimaha Badaha. Waxaan rajaynaynaa in caqabadahan laga gudbo waxaana waydiisaynaa Bulshada Caalamka sidii loogu gudbi lahaa arintan.

**Talaabooyinka kale ee loo Baahan yahay in Si deg deg ah loo Qaado.**

**9.** Talaabooyinka aan kor ku soo sheegney ka sokow, muddada gaaban, waxaa muhiim ah inaan la nimaano xog iyo saldhig adag oo ku saabsan habkii loo hormarin lahaa kor u qaadida xirfadaha loo baahan yahay. Si arintaan loo gaaro waxaan codsanaynaa in Bulshada Caalamka, oo aan kala xiriirayno dad yar oo tiradooda kooban tahay, oo u marayno xubnaha la xiriirka (Focal Points ) ay naga taageeraan sidii aan ku cadeyn laheyn ama Xadeyn lahey dhul marin biyoodkeena iyo kheyraad badeedkiisa.

**10.** Waxaan kaloo isla garaney talo soo jeedimo la taaban karo khuseyana mudada waqtigeeda dhow yahay noona ogolaanaya inaan hergalino ama maamulno ama aan ku badbaadino arimaha khuseeya dhul badeedkeena. Fikiradahan waxay ka yimaadeen dad Soomaaliyeed waxayna waafaqsan yihiin danaha Soomaaliyeed. Waxaan codsanaynaa in dadaalka Bulshada Caalamku ee ku wajahan sidii la noogu taageeri lahaa isticmaalka, badbaadinta iyo Maamulida dhul badeedka Soomaaliyeed in uu ku qotomo codsiyada aan soo jeedinay ayadoo la tixgalinayo danaha dadka Soomaaliya.

**11.** Xubnaha Guddiga la Xiriirka arimaha Soomaaliya ee qaabilsan ka hortaga burcad badeeda (waa xubnihii ka mid ahaa Geedi socodka Kambaala) ayaa waxay ku heshiiyeen in ay si joogto ah u kulmaan. Waxaana ku heshiinay in aan kulano mar labaad muddo aan ka badney labo bilood gudahood si aan dib u eegis ugu sameyno hormarka laga gaaray hagaajinta iyo qoritaanka Qabyo Qoraalka qaabilsan Istaraatejiyada Badaha Soomaaliyeed. Waxaan Qaramada Midoowe ka codsanaynaa in ay sii wado kaalmada iyadoo noo samaynayso Xoghayn iyo habkii isla xiriirta ee khuseeya arintaa.

**Addis Ababa,**

**14 Maarso 2013**